National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Xogta Cudurka qaaxada iyo Raadraacida dadka



Qayb muhiim ah oo kamid ah kahortaga cudurka qaaxada (TB) ayaa ah xogta iyo raadraaca cudurka qaaxada. Ujeedada laga leeyahay xogta iyo raadraaca dadka waa in la raadraaco lana daaweeyo dadka la kulma bakteeriyada qaaxada (TB) sida ugu dhaqsaha badan. Arrintaan waxay joojinaysaa qaadida cudurka qaaxada. Xaashidaan waxay kuu sheegeysaa xog ku saabsan xogta iyo raadraaca dadka.

Isa soobaar marka aad hesho casuumaada

Haddii laanta Adeega Caafimaadka Dadwaynaha (GGD) kugu casuumaan inaad iska baarto cudurka qaaxada, aad oo isa soo baar.
Cudurka qaaxada waa cudur aad u daran, oo ay sababtay bakteeriyadu. Waa muhiim in la ogaado inaad qabto ama aadan qabin bakteeriyada. Waxay muhiim u tahay caafimaadkaaga iyo caafimaadka dadka kuu dhaw. Cudurka waxaa looga hortagi karaa daawooyin.

Waa maxay xogta Cudurka qaaxada iyo Raadraacida dadka?

Haddii qof uu qabo qaaxada sambabada (oo saameysay sambabada) waxay cudurka gaarsiin karaan dadka kale. Caabuqu wuxuu ku faafaa hawada, tusaale ahaan marka qof uu qufaco ama hindhiso. Taasi waa sababta GGD u baarto dadka faafin kara cudurka qaaxada. Arintaan waxaa loo yaqaan raadraacida dadka qaba cudurka.

Ujeedada laga leeyahay xogta iyo raadraaca dadka waa in la raadraaco dadka la kulma bakteeriyada qaaxada (TB) sida ugu dhaqsaha badan. Arrintaan waxay dadka ka ilaalinaysaa inay qaadaan cudurka qaaxada. Marxaladaha qaar, mid kamid ah dadkaas u dhawaaday cudurka ayaa qaba xanuunka. Raadraaca muddada hore la sameeyo waxay ka hortagaysaa faafida cudurka.

Mararka qaar, xogta caabuqa waxaa loo raadiyaa si isku mid ah. Arintaan waxaa loo yaqaan raadraacid.

Sawirka 1-aad. Xigashada iyo Xiriirka Baaritaanka

Yaa la baaraa?

Si lamid ah bukaanka, kalkaalisada GGD waxay soo saartaa liiska qof kasta oo uu bukaanku xiriir la sameeyay. Dadkaan waxay noqon karaan qoyska, saaxiibada, asxaabta ama dadka dhigta iskuulka ama kooxaha ciyaaraha. GGD waxay hubisaa in xogta la helay si qarsoodi ah loo kaydiyo.

Dadka inta badan la jooga qof qaba bukaanka muddo dheer, ayaa marka koowaad la baaraa. Haddii baaritaanku muujiyo in dadkaan qaadeen bakteeriyada qaaxada (TB), sidoo kale waxaa la baraa dadka wax yar la joogo ama muddo aan badneyn uu la joogay dadka kale. Ma isleedahay waa in lagu baaro laakiin aan lagugu casuumin baaritaanka? Waad la xariiri kartaa GGD.

Goorma ayay tahay in lagu baaro?

Baaritaanka qaaxada kaliya wuxuu noqonayaa mid sax ah haddii la sameeyo sideed asbuuc kadib markii ugu danbeysay ee uu qofku xariirka la sameeyay bukaanka qaba TB-da. Dadka waxaa lagu casuumi karaa baaritaanka koowaad haddii bukaanku qabo qufac joogto ah oo socda muddo dheer. Baaritaanka labaad waxaa la sameyn doonaa sideed asbuuc kadib markii qofku la kulmay qofka qaba cudurka.

Yay in la baaro muhiim tahay?

Cudurka qaaxada wuxuu aad u saameyn karaa dadka nidaamkooda difaaca uu laciifay. Mar walba la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga haddii:

- aad qabto wax astaamo ah oo muujin kara cudurka qaaxada;
- nidaamkaaga difaaca jirka laciifay sababo la xariira xanuun ama daawooyin aad qaadato;
- aad haysato carruurta kayar shan sano oo la joogay bukaan qaba cudurka.

Astaamaha qaaxada ee inta badan la arko waa:

- **Qufac**
- **Miisaanka oo yaraada ama oomateedka oo yaraada**
- **Xumad aad u sareysa (qandho)**
- **Dhidid yimaada habbeynkii**

Sidee laguugu sameynayaa baaritaanka qaaxada?

Waxaa jira dhowr qaab oo lagu baaro cudurka qaaxada. Baaritaanadu waa badqab. Sidoo kale waa u badqab carruurta iyo haddii aad uur leedahay.

- **Baaritaanka maqaarka ee lagu ogaado qaaxada (Baaritaanka Mantoux)** Baaritaanka waxaa kujira dheecaan yar oo lagu duraayo maqaarka gaar ahaan qaybta kore ee gacanta bidix. Kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka wuxuu qiimeyn ku sameyn doonaa xasaasiyada maqaarka kadib labo illaa saddex maalmood. Falcelinta xasaasiyada, sida boogo yaryar, waxay muujin karaan inaad qabto bakteeriyada qaaxada (TB).

- **Baaritaanka dhiiga (IGRA)**
  Baaritaan waxaa kamid ah muunad dhiig ah oo lagaa qaadaayo. Dhiiga waxaa loo diraa shaybaarka si baaritaan loogu sameeyo. Baaritaankaan wuxuu muujin karaa inaad qabto bakteeriyada qaaxada (TB). Natiijadu waxay diyaar noqon doontaa kadib labo illaa saddex asbuuc.

- **Raajiyada xabadka (ee sambabada)**
  Raajitada xabadka (ee sambabada) waxay si dhaqso ah u aqoonsan kartaa waxyeelo kasta oo muujin kara inaad qabto cudurka qaaxada. Natiijada raajitada waa inay diyaar noqotaa dhowr maalmood gudahood.

Maxaan ku sameynaynaa xogtaada?

GGD waxay xogtaada gaarka ah ee ay haysto kuna jira faylka caafimaadka u kaydisaa qaab waafaqsan sharciyada qaanuunka degsan. Xogtaada waxaa loo adeegsan doonaa qaab qarsoodi ah si loola socdo loona hormariyo tayada barnaamijka.

Ma qabtaa wax su'aalo, tallooyin, walaacyo ama bogaadin ku saabsan baaritaanka?

- Fadlan la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga. Waxaad xogta xiriirka ka heli kartaa www.ggd.nl iyo kaarka casuumaada talaalka. GGDs waxay leedahay hanaan lasoo gudbiyo cabashooyinka.
- Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada ka heli kartaa www.rivm.nl/tuberculose.

This information is available in English at:
Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:
Te informacje można znaleźć w języku polskim na stronie:
ብቋንቋ ትግርኛ ዝተተርጕመ መልክዕ ናይ'ዚ ሓበሬታ፡ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-
هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضع:
این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:

www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

Published by:

National Institute for Public Health and the Environment, RIVM
PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven
The Netherlands
www.rivm.nl/en

March 2022

Committed to *health and sustainability*

013616